# Jamhuuriyadda Somaliland

## Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda

# Xeer-nidaamiyaha Ansixinta Tayada Qalabka Isgaadhsiinta

## Lr. 03/2021.

# ARAAR

**Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda JSL**

| | |
|---|---|
| **Markaan Arkay:** | Qodobka 3aad faqradihiisa 12aad ee Xeerka Boosaha iyo Isgaashsiinta Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr, 50/2020; |
| **Markaan Arkay:** | Kobaca iyo hormarka baaxadda leh ee Isgaadhsiinta casriga ah oo ay hormood u yihiin Shirkaddaha Isgaadhsiinta dalku; |
| **Markaan garwaaqsaday:** | Baahida loo qabo tayeynta qalabka loo adeegsado Isgaadhsiinta iyo suurta gelinta ansixinta Qalabka loo adeegsado Isgaadhsiinta. |
| **Markaan Tixgaliyay:** | Muhiimadda ay leedahay hubinta qalabka loo adeegsado isgaadhsiinta; |
| **Markaan Tixgaliyay:** | Baahida loo qabo in la helo xeer-nidaamiye tifatira tayada qalabka loo adeegsado Isgaadhsiinta. |
| **Sidaa Darteed;** | Waxaan halkan aan ku soo saaray Xeer-Nidaamiyaha Ansixinta Tayada Qalabka Isgaadhsiinta Dalka, Xeer Lr. 03/2021 oo ka kooban qodobadan soo socda; |

# Tusmo

**CUTUBKA 1AAD**
**QODOBBO GUUD**


| | | |
|---|---|---|
| Qodobka 1aad | Magaca Xeer-Nidaamiyahan | 5 |
| Qodobka 2aad | Xadka Dabbaqaadda Xeer- Nidaamiyaha | 5 |
| Qodobka 3aad | Eray Bixin | 5 |
| Qodobka 4aad | Ujeedooyinka Xeer-nidaamiyahan | 7 |


**CUTUBKA 2AAD**
**MIDAYNTA HALBEEGGA QALABKA ISGAADHSIINTA**


| | | |
|---|---|---|
| Qodobka 5aad | Awoodda Wasaaradda | 7 |
| Qodobka 6aad | Shuruudaha looga baahan yahay Halbeegga | 8 |


**CUTUBKA 3AAD**
**HABRAACA ANSIXINTA TAYADAQALABKA ISGAADHSIINTA**


| | | |
|---|---|---|
| Qodobka 7aad | Caddaynta Waafaqsanaanta ee Soo Saaraha Qalabka | 8 |
| Qodobka 8aad | Habka Ansixinta Shahaadada Tayada Qalabka Isgaadhsiinta ee Wasaaradda: | 9 |
| Qodobka 9aad | Qiimaynta Farsamo ee Qalabka | 9 |

| | | |
|---|---|---|
| Qodobka 10aad | Qalabka la tijaabiyey | 10 |
| Qodobka 11aad | Shahaadada Hubinta Tayada Qalabka | 10 |
| Qodobka 12aad | Muujinta Calaamadda loogu talagalay qalabka la oggolaaday | 11 |
| Qodobka 13aad | Kala Noqoshada Oggolaanshaha Qalabka. | 11 |
| Qodobka 14aad | Hubinta La Jaanqaadka | 11 |
| **Qodobka 15aad** | Liistada Qalabka Isgaadhsiinta ee la oggolaaday | 12 |


**CUTUBKA 4AAD**
**QODOBO GUUD**


| | | |
|---|---|---|
| **Qodobka 16aad** | Tacrifadda Ogolaanshaha Qalabka | 12 |
| **Qodobka 17aad** | Tayada Adeegga | 12 |
| **Qodoka 18aad** | Ku dhaqanka Takoorid la'aanta | 12 |
| **Qodobka 19aad** | Damaanad | 12 |
| **Qodabka 20aad** | Ciqaabta | 13 |


**CUTUBKA 5AAD**
**GABAGABO**


| | | |
|---|---|---|
| **Qodobka 21aad** | Kaabista iyo Wax-bedelka | 13 |
| **Qodobka 22aad** | Dhaqangalka | 13 |

## CUTUBKA 1AAD

## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad

### Magaca Xeer-Nidaamiyahan

Xeer-nidaamiyahan waxaa loogu yeedhayaa Xeer-nidaamiyaha Ansixinta Tayada Qalabka Isgaadhsiinta Xeer Lr. 03/2021.

### Qodobka 2aad

### Xadka Dabbaqaadda:

Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa dhammaan Ruqsadleyaasha Isgaadhsiinta iyo Shirkadaha soo dejiya qalabka lagu adeegsado Isgaadhsiinta si waafaqsan Xeerka Boosaha iyo Iyo Isgaadhsiinta Xeer Lr. 50/2020

### Qodobka 3aad.

### Erey Bixin

Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa erayadan soo socda waxa loola jeedaa:

**Xeer:** Waxa loola jeedaa Xeerka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Xeer Lr.50/2020

**ADSL:** waxaa loola jeedaa Tiknoolajiyadda siisa xawaare sare Codka iyo muuqaalka si loo gaadhsiiyo guryaha iyo goobaha kale ee laga adeegsado Isgaadhsiinta.

**Macmiil:** waxa loo la jeedaa cid kasta oo adeegsata adeegyada Isgaadhsiinta kala duwan.

**Qalabka Isgaadhsiinta:** waxa loo la jeedaa qalab kasta oo isgaadhsiineed oo elektiroonig ah oo loogu talagalay in lagu isticmaalo adeegyada isgaadhsiinta iyo baahinta.

**LAN:** waxaa loola jeedaa shabkada gudaha.

**Liis:** waxaa loola jeedaa liiska qalabka isgaadhsiinta ee la ansixiyay si ay Wasaaraddu u cusbooneysiiso waqti kasta.

**Ansixinta qaab qoraal ah:** waxa loola jeedaa habka lagu ansixiyo shahaadada qalabka Elektrooniga ah qaab gacmeed qoraal ah.

**Wasaarad:** Waxa loola jeedaa Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknolojiyadda Jamhuuriyadda Soomaalilaand.

**MDC:** Caddaynta waafaqsanaanta soo saaraha Qalabka

**Qalabka Shabakadaha:** Waxa loola jeedaa qalab isgaadhsiineed oo fududaynaya isku - xidhnaanta iyo gudbinta Biligta isgaadhsiinta ee u dhexeeya shabakadaha.

**Ansixinta Onlineka ah:** waxa loola jeedaa habka lagu xaqiijinayo nooca oggolaanshaha iyadoo la adeegsanayo codsiga ku salaysan oo loo heli karo si calami ah.

**PABX (Private Automated Branch Exchange):** Waxa loo la jeedaa Laamaha Switch-yada Ruqsadlaha.

**ISDN** (Integrated Services Digital Network)**:** Waxa loo la jeedaa adeegyada Isku-dhafka ah ee Shabakadda Dijital ah ahna nidaam iskuxiran oo gudbiya xogta iyo codka labadaba.

**PRA** (Primary Rate Access): Waxa loo la jeedaa halbeeg isgaadhsiineed oo loo isticmaalo Isku-xidhka Adeegyada Dijitalka ah ee Shabakadda (ISDN) si loogu qaado codad badan iyo gudbinta xogta u dhexeysa shabakadda iyo adeegsadaha.

**BRA (**Basic Rate Access)**:** Waxa loo la jeeda adeeg bixiya laba (2) 64kb/s cod ama xog ah.

**PSTN** (Public Switched Telephone Network)**:** Waxaa loo la jeedaa Switch-ka kala gudbiya shabakadaha Isgaadhsiinta kala duwan

**RFID** (Radio Frequency Identification Device): Waxaa loo la jeedaa aqoonsiga nidaamka aan xadhiga lahayn.

**SETA:** waxa looga jeedaa Simplified Electronic Type Approval

**STBS:** waxaa loo la jeedaa Set top Boxes

**Terminal Equipment:** Waxaa loo la jeedaa Qalab isgaadhsiineed oo xidhiidhiya Shabakadda Ruqsadlaha iyo Macmiilka.

**Type Approval:** Waxaa loo la jeedaa habka lagu hubiyo wada shaqaynta qalabka Isgaadhsiinta iyo wafaqsanaanta tayadiisa.

**Qodobka 4aad:**

**Ujeedooyinka Xeer-nidaamiyahan**

Ujeedooyinka Xeer-nidaamiyahani waa:

1. Qeexidda nidaamka ansixinta qalabka Isgaadhsiinta
2. Diyaarinta qaabka dhawrista tayada qalabka Isgaadhsiinta
3. Qeexidda nidaamka codsiga iyo shuruudaha qalabka isgaadhsiinta
4. Qeexidda qaabka bixinta Shahaadadda tayada qalabka Isgaadhsiinta
5. Dejinta iyo hirgelinta tacriifadda ansixinta qalabka Isgaadhsiinta.

**CUTUBKA 2AAD**

**MIDAYNTA HALBEEGGA QALABKA ISGAADHSIINTA**

**Qodobka 5aad**

**Awoodda Wasaaradda waa:**

1) Qaabeynta heerarka farsamo ee la xidhiidha qalabka isgaadhsiinta iyada oo diyaarinaysa halbeegyo lagula soconayo tayadooda.
2) Ilaalinta xogta qalabka isgaadhsiinta ee la oggolaaday in dalka gudihiisa lagu adeegsado.
3) Hubinta qalabka isgaadhsiinta ee kala duwan marka ay soo codsadaan shirkadaha qalabka sameeya, soo dajiya ama adeegsada, iyada oo la raacayo habraaca ansixinta tayada qalabka iyo tacriifadda loo dejiyay
4) Bixinta shahaadadda Ansixinta Qalabka lagu adeegsanayo dalka gudihiisa ka dib buuxinta shuruudaha ansixinta
5) Dajinta halbeega ogolaanshaha qalabka isgaadhsiinta iyada oo ku salaynaysa heerarka farsmo ee caalamiga ah iyo baahiyaha suuqa

**Qodobka 6aad:**

**Shuruudaha looga baahan yahay Halbeegga:**

1) Qalab kasta oo isgaadhsiineed oo loogu talo galay in lagu iibiyo ama lagu adeegsado dalka gudihiisa, waa in uu Wasaaradda ka haystaa shahaadada ansixinta tayada.
2) Si loo helo waafaqasaanta halbeegga, qalab kasta oo isgaadhsiineed oo ku xidhmaya shabakad isgaadhsiineed waa in uu maraa habraaca ansixinta tayada qalabka isgaadhsiinta.
3) Qalab kasta oo la soo dajinayo waxa looga baahanyahay ogolaanshaha nooca qalabka ka hor iibinta, qaybinta ama rakibaada:
   a) Qalabka loo isticmaalayo ku xidhka shabakadda isgaadhsiinta guud.
   b) Qalabka Isgaadhsiinta ee loo adeegsanayo isku xidhka aan xadhiga lahayn.
   c) Qalabka loogu talo galay soo qabashada biligta Muuq-baahiyaha (TV receivers).

4) Wasaaraddu waxa ay soo saaraysaa xogta qalabka la ansixiyay, halbeegyadooda iyo tacriifadooda sanadkiiba hal mar.

**CUTUBKA 3AAD:**

**HABRAACA ANSIXINTA TAYADA QALABKA ISGAADHSIINTA**

**Qodobka 7aad:**

**Caddaynta Waafaqsanaanta ee Soo Dajiyaha Qalabka:**

1) Shirkadaha qalabka isgaadhsiinta soo dejiyaa, waa in ay caddeeyaan in qalabku la jaan qaadayo halbeegyada dalka iyo Caalamka ka hor inta aan loo ansixin in lagu adeegsado dalka iyaga oo ka keenaya qalab sameeyaha.
2) Shirkadaha adeegsada qalabka ee lagu adeegsado Somaliland gudaheeda waa in ay u soo gudbiyaan xogta caddeynta marka ay Wasaaraddu u baahato.

## Qodobka 8aad:

## Habka Ansixinta Shahaadada Tayada Qalabka Isgaadhsiinta ee Wasaaradda:

1) Si loo helo ansixinta shahaadada tayada qalabka isgaadhsiinta, codsaduhu waa in uu:
   a) Ka Qaato Wasaaradda foomka codsiga ansixinta tayada qalabka.
   b) Soo buuxiyaa foomka codsiga ansixinta tayada qalabka ee Wasaaradda, isaga oo ku soo lifaaqaya dokumintiyadan:

      i. Buugga adeegsadaha.
      ii. Buugga ka shaqaysiinta qalabka
      iii. Waraaqaha farsamo oo ka kooban: Faahfaahinta guud ee qalabka, xogta farsamo iyo adeegyada kale ee uu kaabayo.
      iv. Buugta xayasiiska qalabka.
      v. Caddaynta Waafaqsanaanta ee soo saaraha qalabka, iyo
      vi. Caddaymaha kale ee codsaduhu u arko in ay muhiim u tahay Wasaaradda.

## Qodobka 9aad:

## Qiimaynta Farsamo ee Qalabka:

1) Qiimaynta farsamo ee qalabku waa in ay waafaqaan halbeegyada dalka iyo kuwa caalamiga ah, waxaana loo raacayaa sidan soo socota:
   a) Baadhista iyo hubinta waraaqaha qalabka.
   b) tijaabinta muunado ka mid ah qalabka, halkii ku habboon.
2) Muunadaha qalabka loo soo gudbiyay tijaabintu waa in ay:
   a) Noqdaan kuwo si fiican u shaqaynaya.
   b) Si habboon loogu diyaarayay tijaabinta, looguna dhamaystiray dhamaan qalabka lagama maarmaanka u ah tijaabinta sida Adopters-ka, IWM
   c) Si cad loogu calaamadiyay magaca ganacsiga, nooca iyo lambarka taxanaha ah.

3) Codsaduhu waa in uu soo gudbiyaa faahfaahinta farsamo ama caddaymaha qalabka hadba sida ay wasaaraddu ugu baahato.
4) Iyada oo la tixgelinaayo qodobka (3) waa la diidi karaa codsiga codsadaha haddii ku guul darraysto soo gudbinta warbiximaha muddo hal (1) bilood gudahood ah iyada oo loogu gudbinayo hab qoraal ah.
5) Tijaabada ka dib, codsaduhu waa in uu ku qaato qalabkiisa 20 maalmood gudahood
6) Muunad kasta oo qalab ah iyo waraaqaha loo keenay tijaabo, Wasaaraddu kuma qasbanaan doonto inay u celiso codsadaha.
7) Qalab kasta oo muunad ahaan loo keenay si loo tijaabiyo waa la tuuridoonaa haddii aan codsaduhu qaadan waayo muddo 3 bilood gudahood ah.

## Qodobka 10aad:

## Qalabka la tijaabiyey:

1) Tijaabinta Qalabka waxa looga jeedaa helista kalsooni lagu qabo in qalabka isgaadhsiintu si fiican u qabanyo shaqada.
2) Marka loo baahdo, waa la tijaabinayaa qalabka cusub ee Isgaadhsiinta
3) Tijaabada qalabku waxa ay qaadan kartaa ugu badnaan **hal bilood.**

## Qodobka 11aad:

## Shahaadada Hubinta Tayada Qalabka

1) Wasaaraddu waxa ay siinaysaa codsadaha Buuxiyey shuruudaha Tijaabada shahaadada hubinta tayada qalabkaas u gaar ah.
2) Qalabka la ansixiyey waxba lagama baddali karo iyada oo aan Wasaaraddu ogolaan dibna loo tijaabinin.
3) Ansixinta tayada qalabku ma aha macnaheedu in Wasaaraddu daamaanad qaadayso habsami u shaqayntiisa, wanaagiisa iyo tayadiisaba.
4) Waxa waajib ku ah soo dejiyaha ama Iibiyaha in qalabkaas la ogolaaday tayadiisa uu si fiican ula shaqeeyo shabakadaha Isgaadhsiinta.

5) Wasaaraddu mas'uul kama aha isdhexgal kasta oo lagu keeno qalab kale, dhaawac ama khasaare nafeed, ama waxyeello hantiyeed, oo ka dhalata natiijada tooska ah.
6) Oggolaanshaha ama diidmada hubinta tayada qalabka ee Wasaaraddu waa in ay ku soo baxdo muddo **Bil** gudahood ah.

**Qodobka 12aad:**

**Muujinta Calaamadda loogu talagalay qalabka la oggolaaday:**

1) Qalab kasta oo isgaadhsiineed oo buuxiyey shuruudihii looga baahnaa ee farsamo waxa lagu dhejin doonaa calaamadda hubinta ogolaanshaha Tayada qalabka ee Wasaaraddu bixisay.
2) Cid kasta soo dajisa, iibisa ama iibisa qalabka isgaadhsiibta waa in ay xaqiijisaa in qalabkaasi si muuqata loogu dhejiyo calaamadda ogolaanshaha tayada oo ay ka mid tahay waxyaabahan soo socda:
   a) Astaanta Wasaaradda.
   b) Nooca Qalabka.
   c) Lambar-xarfeed aqoonsi.

**Qodobka 13aad:**

**Kala Noqoshada Oggolaanshaha Qalabka.**

Wasaaraddu waxay ka laaban doontaa oggolaanshaha qalab kasta oo isgaadhsiineed kaas oo isdhex-gal ku samayeeya ama hoos udhac ku keena shaqada qalab isgaadhsiineed oo hore u shaqaynayey.

**Qodobka 14aad:**

**Hubinta La Jaanqaadka**

Hubinta iyo tijaabinta qalabka waxa Shaybaadhka Wasaaradda ama cid kale oo ay Wasaaraddu u igmatay shaqadan.

**Qodobka 15aad:**

**Liistada Qalabka Isgaadhsiinta ee la oggolaaday.**

Liistada qalabka isgaadhsiinta ee la ogolaaday waxa lagu soo saari doonaa Daabacaadaha wasaaradda ama mareegaha internet-ka iyo wargaysyada maxalliga ah.

**CUTUBKA 4AAD:**

**Qodobo Guud**

**Qodobka 16aad:**

**Tacriifadda Ogolaanshaha Qalabka**

Tacriifadda Ogolaanshaha qalabka isgaadhsiinta waxa lagu soo saari doonaa shaxda tacriifadaha ee Wasaaradda Isgaadhsiinta & Teknoolajiyadda.

**Qodobka 17aad:**

**Tayada Adeegga**

1) Adeeg bixiye kasta waa in uu xaqiijiyaa in qalabka la ogolaaday aanu waxba u dhimin shabakadaha hore u jiray
2) Adeeg kasta oo tayadiisu hoos u dhacdo taas oo oo uu sababay qalab tayadiisu hoosayso waa in lagu wargeliyaa Wasaardda si tallaabo ku habboon looga qaado

**Qodobka 18aad:**

**Ku dhaqanka Takoorid la'aanta**

Waxa waajib ah midaynta qalabka Isgaadhsiinta ee lagu adeegsado Dalka waa in uu noqdo mid ku salaysan caddaynta ogolaanshaha tayada qalabka oo ay Wasaaraddu ku maamusha si kala sooc la'aan ah.

**Qodobka 19aad:**

**Damaanad**

1) Qalabka isgaadhsiinta ee lagu adeegsanayo gudaha Somaliland waa in ay lahaadaan damaanad ugu yaraan hal sano ah.

2) Damaanadda ku xusan qodobka sare (1) waa in lagu siiyaa foom gaar ah ama qayb ka mid ah xaashida iibka, islamarkaana si cad loogu faahfaahiyaa adeegga loo qabanayo taas oo ay ka mid noqon karto, beddelaad ama dayactir lacag la'aan ah inta lagu jiro muddo 12 bilood ah.
3) Qof kasta oo iibsada qalab isgaadhsiineed waa in uu ka codsadaa helidda Foomka dammaanadda iyo xaashida iibka soo dejiyaha, qaybiyaha iyo iibiyaha qalabka uu iibsaday.

**Qodobka 20aad:**

**Ciqaabta**

1) Cid kasta oo soo dejisa, qaybisa, dib u iibisa ama adeegsata qalab isgaadhsiineed oo aan la ogolaan, waxa uu gelay dembi uu ku mutaysan doono ganaax.
2) Cid kasta oo soo dejisa ama qaybisa ama dib u iibisa qalab isgaadhsiineed oo aan lahayn damaanad, waxa uu gelay dembi uu kumutaysan doono ganaax.

**CUTUBKA 5AAD:**

**GABAGABO**

**Qodobka 21aad**

**Kaabista iyo Wax-bedelka**

1. Xeer-nidaamiyahan waxa lagu samayn karaa wax-ka-beddel iyo kaabis wakhtiga ay wasaaraddu u baahato.

**Qodobka 22aad**

**Dhaqangalka:**

Xeer- nidaamiyahan waxa uu si rasmi ah u dhaqan geleya isla marka uu saxeexo Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknaloojiyadda laguna soo saaro faafinta rasmiga ah

**10/03/2022**

**Dr. CabdiWeli Sh. Cabdillahi Suufi Jibriil**

**Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda**

**Appendix:**

**List of equipment to be Type Approved:**

1. Bluetooth devices.
2. RFID devices.
3. Wireless microphones.
4. Remote controls.
5. Alarm systems.
6. Low power devices less than one milliwatt.
7. Mobile phones and handheld devices.
8. Cordless telephones.
9. Terminal equipment (CPE).
10. Wireless LAN Equipment.
11. Walkie-talkie.
12. Cable modems.
13. ADSL Equipment.
14. STBs high power radio communication equipment.
15. Complex/ multi line equipment.
16. PSTN switching systems.
17. ISDN PRA/BRA equipment.
18. PBX.
19. Mobile radio access network equipment.
20. Mobile network switching equipment.
21. Fixed and wireless broadband network equipment.
22. Broadcast TV/Radio equipment.
23. SETA
24. STBS

# Jamhuuriyadda Somaliland

## Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tiknoolajiyadda

www.mict.sldgov.org